Independence House
Voice of law & freedom

# FAALLO SHARCI

## Illaalinta iyo Maareynta Deegaanka Jamhuuriyadda Federaalka **Soomaaliya:**

### Qaab-dhismeedka, Daldaloollada, iyo Talosoojeedin

20 January 2026

independencehouse

## Contents


1. **Hordhac** ........ 3
2. **Muhiimadda sharcigan iyo duruufaha dalka ka jira** ........ 3
3. **Qodobada ugu muhiimsan ee Sharciga** ........ 4
4. **Iska-horimaadka iyo daldaloollada Sharciga** ........ 7
   1. Isku ekaanshaha mabaa’dida iyo Ujeedooyinka sharciga ........ 7
   2. Kala Dhantaalnaantya Qaabdhismeedka guddiga Qaran ee Deegaanka ........ 7
   3. Isku ekaanshaha ........ 8
   4. Dhaqaalaha iyo Waxsoosaarka: ........ 8
   5. Maqnaanshaha Faahfaahin Iyo Habraacyo: ........ 8
5. **Gunaanad iyo Talo-soojeedin** ........ 8
   1) **Sharciyeynta luuqadda, iyo mideynta magaca Sharciga:** ........ 9
   2) Waafajinta Mabadi’da Sharciga Dastuur: ........ 9
   3) **Caynta maqaamka iyo masuuliyadaha guddiga Qaran:** ........ 9
   4) Dhameystirka Xeernidaamiyaal: ........ 9
   5) **Cayimidda Halbeegyada:** ........ 9
   6) Fududeynta Fahamka Sharciga: ........ 9
   7) Kordhinta Dedaallada wacyigalinta Dadweynaha: ........ 9

## 1. Hordhac

13 Feebaraayo 2024, Madaxweynaha Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, Xasan Sheikh Maxamuud, oo tixraacaya warqada summaddeeda tahay XGGSH/0494/B11/24 oo ka socotay xafiiska guddoonka golaha shacanka ayuu soo saaray wareegto lagu ogolaanayo dhaqangalka sharci lr 22, oo ciwaankiisa yahay Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka, waxaana lagu soo saaray faafinta rasmiga ah si uu u dhaqangalo. Sharcigan ayaa waxaa soo gudbisay wasaaradda Deegaanka iyo Isbedalja Cimilada, waxaana codka aqlabiyadda ku soo ansixiyay labada aqal ee baarlamaanka Soomaaliya.

Faalladan waxay falanqeyn iyo qiimayn ku samaynaysa qodobada muhiimka ah ee sharciga, iyada oo u aragta inuu yahay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhinaca ilaalinta iyo horumarinta deegaanka iyo cadaalad u helidda dambiyada ka dhanka deegaanka, duurjoogta, iyo badqabka caafimaadka dadka iyo duunyada ku nool deegaanka Soomaaliya. Sharcigan ayaa si toos ah waxa uu u taabanayaa nolosh bulshada Soomaaliyeed qeybaheeda kala duwan, sida hirgelinta mashaariicda ganacsiga, warsooosaarka, iyo ka faa'iideysiga kheyraad ka dabiiciga ah, caafimaadka, maareynta deegaan biyoodka, isticmaalka wabiyada, iyo maareynta qashinka, waxuuna soo rogayaa ciqaabo, iyo digniino ku socda qof walba oo ku xadgudba adeegsiga deegaanka, ama si qaldan u maareeya mashruuc saameyn taban ku leh deegaanka.si kastaba ha ahaatee, sharcigan waxaa ka muuqda cillado iyo daldaloollo waaweyn oo haddii aan dib u eegis lagu sameyn keeni kara in u ujeeddada guud ee sharciga iyo awoodda uu u leeyahay in uu wax ka bedalo isticmaalka, adeegsiga iyo nabaadguurka deegaanka ay meesha ka baxdo ama ay keento cuuryaamin dhaqaale.

## 2. Muhiimadda sharcigan iyo duruufaha dalka ka jira

Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka waa laf-dhabarta joogteynta iyo xaqiijinta bedqabka deegaanka, iyo ka hortaga dabar go'a noolayaasha aasaasiga u ah nolosha dunida, gaar ahaan ilaalinta kuwa baaba'aya, sharcigan waxuu muhiim u yahay jiritaamka bulshooyinka iyo si habboon u adeegsiga deegaanka. Soomaaliya oo ka mid ah dalalka ay sida ba'an u saameysay isbedalka cimilada, ayna ka dhalatay abaaraha dabada dheeraaday, nabaadguurka dhulka, iyo baaba'a duurjoogta ama haajiridda duurjoogta, mudana aan helin hey'ad dowladeed oo iska xilsaarta ilaalinta deegaanka, iyo kobcinta wacyiga garaadka bulshada ee deegaanka iyo saameynta ay hawlaha aadanaha ku leeyihiin deegaanka, iyo nolosha mustaqbalka ee dadka iyo duunyada ayaa soo saartay sharciga deegaanka. In kasta oo Dastuurka Kumeelgaarka ah ee JFS[1] uu dammaanad qaadayo in qof walba oo ku nool dalka Soomaaliya uu helo deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah, iyo qof walba oo muwaadin ah uu xaq u leeyahay in uu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad-dhaaf ah oo Deegaanka waxyeello u geysan kara ayaa horay u laheyn sharci dhawraya deegaanka. Helitaanka deegaan ku habboon nolosha ayaa ah xaq dastuuri ah oo lagu damaanad qaaday dastuurka ku meelgaaka ah, hadaba iyada oo taas lagu duulayo ayay

[1] Qodobka 25 faqrada 1 iyo 2'aad, Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, 2012

wasaaradda deegaanka iyo isbedalka cimilada waxay soo gudbisay sharcigan iyo siyaasadda qaran ee maareynta deegaanka.

Inkasta oo aysan Soomaaliya laheyn warshado iyo matoorada wasakheeya hawada, hadana duunyada iyo dadka Soomaaliyeed waxay la tacaalayaan saameynta isbedalka cimilada, sida ay qabanaa warbixinno iyo daraasado laga sameeyay Soomaaliya, isbedalka cimilada ayaa saameyn ku leh dhaqaalaha iyo nolosha dadla Soomaaliya.[2] Jaristya dhirta, sameynta dhuxusha, ku daadista wasakhda xeebaha badda Soomaaliya, iyo ugaarsiga duurjoogta ayaa caado ka noqotay Soomaaliya, waxaana soo noqnoqday abaaro iyo nabaad guurka dhulka, taas oo keentay hoos u dhaca waxsoorka, iyo koboca colaadaha, sida ku cad cutubka sadexaad ee dastuurka, qodobkiisa 45'aad, waxa uu farayaa xukuumadda federaalka ah iyo dowladda xubnaha ka ah, iyo qof walba oo ku nool Soomaaliya in la ilaaliyo deegaanka, waxay farqada 4aad tilmaameysaa in la sameeyo siyaasad qaran oo lagu maareeyo deegaanka.[3]

Sharcigan ayaa ahmiyad gooni ah u leh, ka hortaga wasakhowga hawada, biyaha, waxuuna saldhig u yahay maareynta qashinka, ilaalinta duurjoogta, badqabka duunyada iyo helitaanka deegaan nadiif ah oo qof ka Soomaaliga ah aan caafimaadkiisa wax u dhimeyn. Shacigaan ayaa dhidibada u aasaya hannaan habboon oo looga faa'iideysna karo kheyraadka dabiiciga ah ee Soomaaliya, iyo in laga hortago in ay dhacaan mussiibooyin deegaanka waxyeelo u geysta oo ay keenaan dhaqdhaqaaq aanadanaha.

## 3. Qodobada ugu muhiimsan ee Sharciga

Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka JFS waxa uu ka kooban yahay Sideed iyo toban cutub iyo 102 qodob, oo qoondeynaya qaab-dhismeedka sharciga Ilaalinta iyo Maareynta deegaanka. **Cutubka 1aad iyo 2aad** ee sharcigan waxa ay qeexayaan eraybixinta, ujeeddada sharciga, dhanqangal sharciga, iyo mabaadi'da guud ee salka u ah sharciga maareynta deegaanka, gaar ahaan mabaad'ida xaqa deegaan nadiif ah, maareynta qashinka, masuuliyadda waxyeyleynta deegaan, horumar waara, mabda'a taxadarka, iyo qiimeynta saameynta deegaanka ee bulshada.

Qodobkiisa 11$^{aad}$, waxa uu dhigayaa ujeedooyinka sharcigan:

1. In la horumariyo lagana shaqeeyo sidii dadka Soomaaliyeed u helilahaayeen deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba.
2. In laga hortago, la xakameeyo, lala socdo, waxna laga qabto wasakheyta iyo nabaad guurka deegaanka.
3. In kor looqaado fahamka kheyraadka dabiiciga ah ee muhiimka u ah qaranka Soomaaliya.

[2] Somali Economic Update 'Addressing Climate Change Challenges for Economic Growth', World Bank Group, June 2024.

[3] Qodobka 45aad ee dastuurka kumeel gaarka ah, farqadiisa 4'aad.

4. In wasakheynta saameynta daran laga ilaaliyo dadka, biyaha, carrada, dhirta, xayawaanka, hawada, iyo noolaha kala duwan.
5. In la qaado talaabooyonka habboon ee lagu maareynayo kheyraadka dabiiciga, iyo sidii loo nooleyn lahaa deegaanka la waxyeeleeyay.
6. In la dhiirigeliyo nidaamka horumarka waara.
7. In la yareeyo qashinka, isla markaan la horumariyo in si habboon loo maareyo qashinka
8. In la qayaxo qaabshismeedka dowladda ee maareynta deegaanka ee heer federal iyo dowlad goboleed.
9. In la xoojiyo sidii ay Soomaaliya caalamka iyo dowladaha kale ugula shaqeyn laheyd arrimaha deegaanka.
10. In si taxadar leh loo qiimeeyo waxyeelada ka soo gaari karta deegaanka soo saarista shidaalka iyo macdanta.

**Cutubka 3’aad** ee sharcigan waxa uu ka hadlayaa maasuuliyadda maareynta deegaanka iyo cidda leh awooddaha iyo masuuliyadda hirgelinta sharciga, sida ku cad **qodobka 12aad** waxa uu masuuliyadda ilaalinta iyo maareynta deegaanka saarayaa wasaaeradd deegaanka iyo isbedalka cimilda ee dowladda federaalka ah iyo wasaaradaha dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah, waxayna soo saarayaan hagayaal iyo tilmaamayaal lagu dhaqangelinayo sharcigan. Waxuuna dhisayaa gudiga qaran ee deegaanka sida ku xusan **qodobka 14’aad.**

**Cutubka 4aad** ee sharcigan waxa ka hadlayaa hannaanka hubinta, dhawrista deegaanka iyo kormeerka, waxuu farayaa in la sameeyo waxbixino qiimeyn oo ku aadan isbedala deegaanka, waxuu waajibinayaa in hey’adaha ku hawlan mashaariicda saameynta ku leh deegaanka ay wasaradda u soo gudbiyaan waxbixin sandle ah, ama sargaalka deegaanka la wadaagan xogta saameynta deegaanka ee mashaariicda wasaaradda iyo cidda kale ee ay quseyso. Waxuu qayaxayaa cid leh awoodda kormeerka sida ku cad qodobka **20’aad** iyo awoodaha sargaalka deegaanka sida uu dhigayo qodobka **21’’aad** ee sharcigan.

**Cutubka 5aad** ee sharciga waxaa lagu qeyaxay hannaanka helista xogta iyo macluumaadka ku saabsan deeganka, waxuuna adkeynayaa in ay wasaaradda diyaariso warbixin sanadeed ku saabsan deegaanka iyada oo la wadaageysa baarlamaanka Soomaaliya, sida ku cad qodobka 25’aad ee sharcigan, qof walba oo Soomaaliyeed waxuu xaq u leeyahay in uu helo xogta iyo macluumaadka deegaanka.

**Cutubka 6’aad,** qodobada ugu muhiimsan ee uu ka hadlayo cutubkaan waa maareynta masakhda, waxuuna soo rogayaa in qof iyo hey’ad walba oo ku hawlan shaqo wasakheyn karta hawada, biyaha, ama deegaanka ay hesho ruqsad fasax ka hor inta aysan gelin shaqo, sida ku cad **qodobka 28’aad.** Dhanka kale waxa uu ku waajibanayaa wasaaradda in ay halbeeg u dajiso tayada biyaha, hawada, codka, wasakhda dareeaha ee saameynta ku leh deegaanka. Si la mid ah, waxaa raxumaha ganacsi lagu waajibinayaa in ay warbixin ka diyaariyaan heerka wasakheynta deegaan ee ay keeni karaan hawlaha ganacsi, sida ku cad **qodonka 33’aad ee** sharcigan.

Si guud **cutubka 7'aad** ee sharcigan waxuu ka saabsanyahay xakameynta iyo maareynta walxaha khatarta ku ah deegaanka, sida shidaalka, kiimikooyinka, walxaha shoocaaca daaya, waxuuna mamnuucayaa in hawada lagu siidaayo wax dhaawacaya, sida ka muuqata **qodobka 39aad** waxuu farayaa in aysan shaqada la xariirta walxaha khatarta ah aysan qaban karin cid ruqsad heysato ma ahane, waxaa loo baahanyahay in la sameeyo warbixin qiimeyn ka hor inta aan lagu dhaqaaqin hawl keeneysa khatar deegaan sida qodista shidaalka, rakabidda qalab deynaya shucaac, iyo hawlaha kale ee khatarta ah. Sharcigan waxuu farayaa in qiimeyn lagu sameeyo khasaaraha ka dhasha hawl khatar ku ah deegaan oo dhacday sida in shidaal iyo wasakh lagu shubay badda, waana in cidda masuulka ka ah hawlshaa ay bixiso magdhaw iyo kharashka nadiifinta deegaanka. **Qodobka 45'aad** ee sharcigan waxuu farayaa in qof walba oo tijaabo sameyneysa taas oo saameyn ku leh deegaanka uu u baahanyahay in uu ruqsad ka heysto wasaaradda.

**Cutubka 8'aad** waa cutub muhiim waxuuna ka hadlayaa ilaalinta dhulka, sida maareynta dhul daaqsimeeedka, keymaha, buuraha, wabiyada, goobaha taariikhiga ah, seerooyinka, dhulka qoyan, dhirta. Sharciga gaar ahaan cutubka 8'aad waxuu mamnuucayaa in qashin lagu shubo wabiyada, dhulka qoyan, iyo ilo biyoodyada, jarista iyo xaalufinta dhirta, burburinta buuraha, soo saarita dhuxusha, wuxuuna fal dambiyeed lagu soo rogayaa qof iyo hey'ad walba oo ku xad gudbta dhulka, waxana ku cad ciqaabo uu la kulmi karo qofka lagu helo dambigaan.

**Cutubka 11'aad,** Sida ku cad qodobka **57aad** ee sharcigan, wasaaradda waxay sameyneysaa ama u baahantahay qiimeyn saameynta deegaanka ee hawlaha ruqsada loo rabo, waxayna fasax hawlgal siineysaa shaqsiga ama shirkadda kadib marka ay ku qanacdo qiimeynta iyo habraaca ilaalinta deegaanka ee loo dajiyay,si la mid ahna waxay kala noqon kartaa ruqsada haddii lagu xaqgubo sharuudaha la dajiyay ee ilaalinta deegaanka. Wasaaradda waxay dabagal ku sameynsaa hawlaha saameynta ku leh deegaanka ee ka socda dalka. Waxaaradda waxay dhiseysaa guddi farsamo oo ku xeeldheer deegaanka oo qiimeyn ku Sameeya warbixinada qiimeynta saameynta deegaan si ay u bixiso ruqsad ama u diido, sida ku cad qodonka 6**1'aad** ee sharcigan.

Maareynta qashinka **qodobka 70'aad ee** sharcigan waxuu ka hadlayaa hannaanka maareynta qashinka, iyo cidda masuulka ah, waxuuna farayaa maamulada dowladaha hoose in ay goobo gaar ah u asteeyaan qashinka.

Sharcigan waxuu mamnuucayaa soo dajinta iyo ka ganacsiga bacda, sida ku cad qodobka **72'aad**.

**Cutubka 14'aad** waxuu ka hadlayaa ilaalinta iyo dhawrista noolayasha kala duwan, waxuuna mamnuucayaa ugaarsiga duurjoogta, iyo leynta shimbiraha, waxuuna farayaa in wasaaradda ay sameyso daraasad iyo tiro koob ku saabsan noolayasha kala duwan ee kunool Soomaaliya, sida ku cad qodobka **73'aad iyo 74'aad** ee sharcigan.

**Cutunka 15'aad** waxuu ka hadlayaa ilaalinta xeebaha iyo badaha, waxuu mamnuucayaa in qashin lagu shubo xeebaha, sida ku cad qodobka **76'aad faqradiisa 3'aad**, waxuuna

mamnuucayaa in xeebaha laga fuliyo mashruuc aan ruqsad loo heyn, si la mid ah waxuu wasaaradda iyo hey'adaha maamul goboleedyada farayaa in ay sameeyaan cilmi baarisyo iyo daraasado ku aadan noolaha badda.

**Qodobka 96'aad** ee sharcigan waxuu dhigayaa in wasaaradda oo kaashaneysa wasaaradda maaliyadda ay xeernidaamiye ku soo saareysa qidmada ruqsadaha iyo lacagaha.

Gebogabadii, 102 qodob iyo 18 cutub oo uu ka koobanyahay sharciga, waxaa ku lifaaqan liiska heshiisyada caalamiga ah ee sharcigan la jaanqaadayo, iyo lifaaqa hawlaha ay tahay waajib in laga diyaariyo warbixin qiimeyn ka hor inta aan la bilaabin, saameynta ay ku leeyihiin deegaanka aawadeed. Si kastaba, sharciga waxaa ka muuqdo dodobo soo noqnoqday, iyo kuwa u baahan in la bayaaniyo oo uu ka tagay qodobo muhiim ah, waxaana sidoo kale ka muuqdo daldaloollo waaweyn oo si qoto dheer loogu falanqeyn doono qaybta soo socta.

## 4. Iska-horimaadka iyo daldaloollada Sharciga

Inkasta oo sharcigan yahay kii koowaad oo deegaanka oo ay Soomaaliya yeelato, hadana waxuu saldhig u noqonyaa sharciyo iyo xeernidaamiyaal badan oo muhiim u ah deegaanka, haddana qodobbadiisu waxay muujinayaan daldaloollo iyo iska-horimaadyo waaweyn oo taabanaya hannaanka maareynta, iyo ilaalinta deeganka isu-duwidda awoodaha iyo xilalka, iyo habka fulinta sharcigan. Daldaloolladaas haddii aan la xallin waxay si dhab ah u wiiqi karaan ujeeddadii sharcigan, waxayna dhalin karaan khilaaf joogto ah oo ka dhex dhasha hay'adaha dowladda, gaar ahaan maamulada iyo dowladda dhexe, waxaa kale oo ay culeys maaliyadeed ku keeni karaan hey'adaha iyo shaqsiyaadka hawlaha mashaariic ee saameynta ku leh deegaanka ka fulinaya Soomaaliya. Sharcigan waxaa saldhig u ah siyaasadda qaran, taasina waxay keeneysaa in haddii xukuumadda ay bedasho siyaasaddeeda ay tahay in la bedalo isna, halkii ay ahaan laheyd in sharciga uu noqdo saldhigga siyaasadda. Marka laga soo tago luuqadda iyo erayada sharciga, iyo nidaam sanaan la'aanta magaca sharciga, waxaa jira qodo waaweyn oo ay tahay in dib u eegis lagu sameeyo si sharciga u noqdo mid fahamkiisa fududyahay, isla markaana saldhig noqoda.

Daldaloollada iyo iska-horimaadyada qodobada Sharciga waxaa kamid ah;

1. Isku ekaanshaha mabaa'dida iyo Ujeedooyinka sharciga: Sharciga isaga oo ka jawaabaya baahida loo qabo helista sharci lagu maareeyo arrimaha deegaanka ayaa la sameeyay, waxaana muuqata in aan lagu bixin juhdi iyo dagaalkii loo baahnaa oo ay ka dhiman tahahay turxaan bixin, sida ka muuqata waxaa isku eg maba'dida iyo ujeedooyinka sharciga, waxayna u baahanyihiin kala saaris.
2. Kala Dhantaalnaantya Qaabdhismeedka guddiga Qaran ee Deegaanka, sharciga si uu u noqdo dhaqangal ayuu waxuu dhisayaa gudiga qaran ee deegaanka mana kala cadeyn kaalmaha xubnaha guddiga iyo qaabka wadashaqeynta ee xubnaha gudiga marka laga reebo in uu guddoomiye u yahay wasiirka wasaaradda deegaanka.

3. Isku ekaanshaha Qodobada: Sharcigan waa mid baaxadweyn oo saldhig u ah sharuuc iyo xeerar kale oo ilaalinta iyo maareyngta deegaanka la xariira, taasina waxay keentay in qodobada qaar ay noqdaan kuwa soo noq noqda, waxayna keeneysaa in iska hor imaad oo ku yimaad fasiraadda iyo dhaqangelinta sharciga.
4. Dhaqaalaha iyo Waxsoosaarka: Sharcigan waxuu saameyn ku leeyahay dhaqaalaha iyo waxsoosaarka dalka, waxuuna warshada iyo hey'adaha ku lugta leh arrrimaha kheyraadka dabiiciga ah ka dalbanayaa in ay sameeyaan warbixinta saameynta deegaanka taasina waxay keeneysaa xanibaad iyo culeys haddii aan loo maareyn si hufan, waxaan kale oo aan cadeyn cida bixineysa ruqsadda, tusaale haddii mashruuca laga fulinayo maamul goboleed, hey'ada ma ku kaaftoomi kartaa shatiga wasaaradda mise waa in ay ruqsad labaad ka qaadato maamul goboleedka.
5. Maqnaanshaha Faahfaahin Iyo Habraacyo: Inkasta uu Sharcigu dejinayo mabaad'ida iyo ujeedooyin guud, haddana qodobada qaar waxa uu abuurayaan daldaloolo ballaaran oo la xiriira habka loo fulinayo iyo habraacyada lagu maamulayo, gaar ahaan, sharcigu ma daboolin;

   a) Xadiga iyo mugga ay la egtahay mashruuca saameynta ku leh deegaanka,
   b) Waxaa jira lifaaqa mashaariic oo uu sharciga sheegay in laga rabo warbixinta saameynta deegaanka, mise cadda xadiga iyo halbeega, taasina waxay dalbaneysaa xeer nidaamiyaal iyo xeer hoosaadyo.

## 5. Gunaanad iyo Talo-soojeedin

Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaan JFS waa sharci muhiim u ah ilaalinta iyo horumarinta deegaanka, waxuu qeyb muhiim ka yahay helidda deegaan nadiif ah oo ku habboon nolosha iyo badqabka noolaha oo ah xaq dastuuri ah, sida ku cad qodobka 25 faqrada 1 iyo 2'aad, Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, 2012, waxuuna gogol xaar u yahay hirgelinta cutubka sadexaad ee dastuurka Kumeelgaarka ah, sida ay qabaan qodobada 43, 44, iyo 45 ee dastuurka. Sharcigan oo saldhig u ah sameynta qaanuun walba oo saameyn ku leh deegaan ama la xariira, waa talaabo markii u horeysay ay Soomaaliyo kuyeelaneyso sharcig deegaan, waana talaabo loo qaaday dhanka helitaanka xaqa deegaan nadiif. Sida ay tabiyaan warbixino badan oo deegaanka Soomaaliya laga sameeyay, waxay xusayaan in ay dhacaan xadgudubyo aan tiro laheyn oo ka dhan ah deegaanka, sameynta sharcigan ayaa ka dhigan fududeynaya helidda taageero dhaqaale iyo mid nadaam oo wax looga qaban karo arrimaha deegaan Soomaaliya ee sii xumaanayay. Si kastaba ha ahaatee, sida falanqaynta hore muujisay, sharcigu waxa uu leeyahay daldaloollo sharci, iska-horimaad, iyo mugdi wadashaqeynta maamul oo u baahan in loo wajaho si loo helo sharci hufan oo hirgelintiisa ay fududahay.

Talo soojeedinada soo socda ayaa gacan ka geysan kara in sharcigu noqdo mid la hirgelin karo oo wax-ku-ool ah, isla markaana wax ku biiriya dadaallada lagu hagaajinayo helitaanka deegaan nadiif:

1) Sharciyeynta luuqadda, iyo mideynta magaca Sharciga: Waxaa muhiim ah in dib eegis lagu sameeyo luuqada uu ku qoranyahay sharciga gaar ahaan Soomaaliga, waxaa kale oo muuqata in dhigaalka magaca sharciga aysan mideysneyn, sida ku qoran qodobka koowaad ee sharciga, magaca sharciga waa ‘Maareynta Deegaanka’, halka wareegtada madaxweynaha saxiixay magaca sharciga lagu sheegay ‘Sharciga Illaalinta iyo Maareynta Deegaanka’, hadaba waxaan talo ku soo jeedineynaa in la iswaafajiyo hab dhigaalka magaca sharciga, iyo in luuqada Soomaaliga laga dhigo mid sharci.

2) Waafajinta Mabadi’da Sharciga Dastuur: Sida ku xusan qodobka 4’aad ee sharciga, mabadi’ada sharcigan waxay la midyihiin tan siyaasadda qaran, tanina waa qalad sharci, halkii ay aheyd in sharciga hago siyaasadda qaran, waxaa muuqata in sharciga lagu saleeyay siyaasadda.

3) Cayiminta maqaamka iyo masuuliyadaha guddiga Qaran: Qodobka 14’aad ee sharcigan waxuu dhisayaa gudiga qaran ee deegaanka, mise cadeyn maqaamka iyo masuuliyadaha guddiga, keliya waxuu sheegay in guddoomiyaha gudiga uu yahay wasiirka wasaaradda, hadaba waxaa muhiim ah in la cadeeyo kaalimaha iyo masuuliyada si ay shaqada iyo hirgelinta sharciga u noqoto mid hufan.

4) Dhameystirka Xeernidaamiyaal: Sharcigan oo ah saldhiga sharciyada deegaanka waxuu dalbanayaa in la sameeyo xeernidaamiyaal dhawr ah oo aysan suurto gal aheyn dhaqangelinta sharcigan la’aantood, sidaa daraadeed, waxaan talo ku soo jeedineynaa in la dhameystiro xeerarkaa.

5) Cayimidda Halbeegyada: Sida ku cad sharciga waxuu saameyn ku leeyahay dhaqaalaha iyo noloshada dadka, iyo bedqabka deegaanka, waxuuna awood xad dhaaf ah siinayaa sargaalka deeganka, taas oo saameyn taban ka dhalan karto haddii aan si quman loo adeegsan, sidaa daraadeed waxaa talo ku soo jeedineynaa in cayimo xadiga iyo baaxadda mashaariicda ay tahay in lagu dabaqo hirgelintooda sharcigan.

6) Fududeynta Fahamka Sharciga: Sida ka muuqata sharciga waxaa jira qodobo dhawr ah oo isku eg siyaabo kala duwan uga muuqda dhigaalka sharciga dhexdiisa, hadaba si loo yareeyo mugdiga iyo jaahwareeerka, waxaan talo ku soo jeedineynaa in dib eegis lagu sameeyo qodobada isku ujeedada ah ee siyaabaha kala duwan uga soo noqnoqday sharciga oo laga sharciga mid kooban, cad, lana fahmi karo.

7) Kordhinta Dedaallada wacyigalinta Dadweynaha: Waxaa muhiim ah in la xoojiyo wacyiga bulshada, gaar ahaan dadka nugul sida haweenka, carruurta, dadka barakacayaasha ah, iyo bulshooyinka leh helitaan xaddidan oo adeegyo sharci ah. Wacyigelinta joogtada ah ee ku saabsan xuquuqda sharciga, waajibaadka, iyo sida loo heli karo kaalmo-sharciyeedku waxay kaalin muuqata ka qaadan kartaa dhimista caqabadaha hortaagan helitaanka caddaaladda.

Independence House
Voice of law & freedom

QORE

**Xasan Maxamuud Maxamad,** qoraa, ahna agaasimaha fulinta Independence House, horayna u soo noqday agaasimaha warbaahinta **Goobjoog Media Group.**